## Arrinta TB Alert

**TB Alert** waa hay'adda kaliya ee samafal kuna taal UK ee kor u qaada ogaalka qaaxada aduunweynaha kuna caawisa NHSta iney warbixin siiso bukaanka.
Waanu taageernaa mashaariicda hubinaysa iney dadka bukaa ee wadamada soo korayaa heleen daaweyn iyo wacyigelin saxa. Hadaad na taageerto saamayn la taaban karo ayaanu u geysaneynaa TBda aduun weynaha dad badana wuu badbaadi.

## Sii guda gal TB Alert

Haddaad TB qabto oo aad rabtid inaad wax ka ogaatid qof hore cudurka u qabay, waxaad ka heli buuga la gidhaado The Tuberculosis Survival Handbook (buuga badbaadada TBda) oo uu qoray Paul Mayho (soo saarista labaad). Buuga waxa la siiyaa £14.95 waxaana laga helaa dukaamada buugaagta ee xaafadda, adeega buugta Gazelle iyo www.amazon.co.uk ama toos ula xidhiidh madbacadaha, websaytka Merit Publishing International www.meritpublishing.com ama email merituk@aol.com. Lambarka tixraaca ee aad buuga ku dalbaneysid waa ISBN 1 873413 14 9.

Website www.tbsurvivalproject.org



Ka badbaadi TBda qoyskaaga iyo saaxiibadaa – qaado dawada TBda

**Ogsoonow** intaad dawada qaadaneysid waxa talo iyo caawimo kuula joga kalkaaliyaha. Fadlan la xidhiidh kalkaaliyaha TB haddaad dareentid xanuun ama aad wax ka garanweydo dawooyinka aad qaadaneysid.

Kalkaalyahaaga TBdu waa: ______________________

Dhakhtarkaaga cisbitaalku waa: ______________________

Kala xiriir: ______________________

Email: ______________________

**TB Alert** waa hay'adda kaliya ee samafal kuna taal UK ee kor u qaada ogaalka qaaxada aduunweynaha kuna caawisa NHSta iney warbixin siiso bukaanka. Waanu taageernaa mashaariicda hubinaysa iney dadka buka ee wadamada soo korayaa heleen daawyn iyo wacyigelin saxa. Hadaad na taageerto saamayn la taaban karo ayaanu u geysaneynaa TBda aduun weynaha dad badana wuu badbaadi.

**TB Alert**,
Community Base,
113 Queens Road,
Brighton BN1 3XG
Tel: 01273 234030

Wixii warbixin dheeraada ah iyo nuqulka warqaddan, fadlan kala xiriir 01273 234 770 (xiliga shaqada oo kaliya).

Sii aad deeq ama iska-wax-u-qabso u tartid TB Alert,fadlan kala xiriirt 01273 234 784 (xiliga shaqada oo kaliya).

Ama gal websaytkayaga www.tbalert.org

Warbixinta warqaddan ku qoran ee ku saabsan baadhitaanka iyo daaweynta Qaaxada waxa loola jeedaa warbixin guud uun, loolama jeedo iney kuu bedesho aqoontii iyo xirfaddii iyo go'aamintii ay lahaayeen dhakhaatiirtu, farmasiilayaasha iyo/ama aqooyahanada kale ee daryeelka caafimaadka ee daryeela bukaanka. Warbixin kaliya oo warqaddan ku qoran looguma talo gelin go'aaminta baadhista ama daaweynta. Su'aalaha iyo wixii khuseeya ee ku saabsan baadhista iyo daaweynta waa in loo gudbiyaa aqoonyahanada daryeelka caafimaadka.

Shaqada horumarka aasaasiga ah ee Shabakedda North London TB

WARBIXINTA DADKA BUKA

# Raad-raaca xidhiidhka iyo shaandheynta qaaxada (TB)



## TBdu  waa maxay?

Qaaxadu (TB) waa baakteeriya  infekshan ah  oo badanaa laga helo sanbabada  qayb kasta oo jidhka ka mid ahna ku dhici karta. Taas waxa la yidhaahdaa Active TB waana la dawayn karaa haddii door dawo ah la qaato  oo ah ugu yaraan in laqaato lix bilood. TBda sanbabada  ama cunaha oo kaliyaa cudurka fidiya, dadka badankiisa kuma fiddo hadday laba wiig gudahood ku bilaabaan iney qaataan dawada.

## Sideebaa loo qaadaa qaaxada?

Marka uu qufaco ama uu hindhiso qof qaba qaaxadu wuxuu hawada ku siidaayaa jeermis kaas ayuu dadka kalana neefsdaan oo qaataan. Dadka badanaa qaadaa waa kuwa in badan la jooga kuwa qaaxada qaba (badanaa kuwa isqaba iyo kuwa guriga kula nool ama sida naadirka ah jaalihiisa shaqada). Uma eka in qof qaaxo ka qaado meelaha ay ka midka yihiin basaska ama tareenada, mar hadday daruuri tahay si loo kala qaado xaanuunka in qof kale oo qaba dhawr saacadood laysu dhawaado, TBdu kuma fiddo candhuuf  la tufo iyo shay la wadaago.

## Waa maxay raad-raaca xiriirka iyo shaandheynta?

Haddaad xiriir dhow  la yeelatid qof qaba cudurka qaaxada oo uu qufaco ama hindhiso adigoo ku dhow waxaad u baahantahay inaad iska baadhid cudurka ama aad yeelatay calaamadihii jeermiska TBda. Tani waa muhiim waayo waxaad heli kartaa talada iyo daaweynta saxa ah. Haddi lala gaadho dadka daweynta munaasibka ah waxay ka caawineysaa in aanay sii fidin TBdu.

## Iska baadhista:

Si aad isaga baadhid bal inaad wax astaamo TB ah leedahay,in hore lagaaga tallaalay BCG (oo waxoogaa kaa cabin kara TB) iyo bal inaad TBda qaaday oo weli aanay astaamihi kaa soo bixin, markaa waxa lagu marinayaa mid ama laba baadhisood sida:

- baadhista jidhka ee la yidhaahdo Mantoux marmar baadhistan waa lagu celiyaa 6-8 wiig.
- baadhista dhiiga
- sawirka feedhaha.

Jawaabaha baadhistan ayaa cadeeya talada iyo daaweynta kugu habboon.

Ha la yaabin haddii dad isku qoys ah ama isku koox ah isku si loo daaweyn waayo.

## Astaamaha layska eego:

- Qufac joogto noqda in ka badan 3 wiig, dawada caadiga ah oo aan waxba kaa tarin xanuunkiina kugu sii xumaado.
- Xumad  (kulayl badan).
- Dhidid badan oo habeenkii ah oo kalifa in gogosha la bedelo.
- Miisaanka oo sabab la'aan u yaraada.
- Daal (awood darro iyo daal badan).
- Qanjidhada oo barara.
- Cunto xumo.
- Dhiig la qufaco (tani aad uma dhacdo laakiin waxay u baahantahay daaweyn degdeg ah)

Astaamahani hadana waxay noqon karaan calaamado mushkalado kele ah, lakiin hadaad hesho saddex ama ka badan oo aad werwertid u tag dhakhtarka xaafaddiina.

## Maxaan samaynayaa haddaanu isdhexgalney qof qaba qaaxo (TB)?

Haddaad is dhex-gasheen qof qaba, waa inaad la xidhiidha adeega caafimaadka si balan lagugu baadho laguugu sameeyo. Haddaydaan isdhexgelin oo aad ka warwarsan tahay, la xidhiidh dhakhtarka feedhaha ama GBga xaafaddiina, hadday u arkaan iney daruuri tahay markaas ayaa balan laguu samaynayaa.

## Ma wadan karaa shaqadeyda maalinlaha ah?

Ma muuqato sabab aad u joojisid shaqo maalmeedkaaga xataa haddaad xidhiidh yeelateen waxyaabaha TBda laga qaado. Weli jaanis yar weeye inaad qaadid cudurka TB ama jeermiska, waanay yartay inaad dad kale u sii gudbisid. Looma baahna inaad fasax ka  qaadatid shaqada ama iskuulka adigoo qufacu kugu raago ilaa dhawr wiig . Ama bukooda mooyee. Hadaad aad uga shakiday inaad qaaday qaaxo markaa waxa lagu siinayaa talo khabiireed.

Somali_63796 Contact Tracing.indd 2 10/06/2009 12:00